



#GrandUnderstandings

Fariinteena ku Socota Qoysaska GrandFamilies

Waxaan aqoonsan nahay in korinta ilmaha aad ayeeyada ama awoowga u tahay ama qof kale oo ehel ah ay hawl badan kaaga baahan tahay. Xasusnow, inaad siinayso daryeel fiican hadda iyo mustaqbalkaba. Haddaan nahay Ohio Statewide Family Engagement Center- waan aragnaa aana maqalnaa fikirkaaga. Waxaan doonaynaa inaan kaa taageerno la shaqaynta dugsiyada iyo bulshada. Hoos waxaad ka helaysaa khayraadka qaarkood oo ku saabsan dugsiyada iyo faya qabka qoyska- laguna abuuray caawimaada grandfamilies. Marka qoysaska, dugsiyada iyo bulshooyinku wada shaqeeyaan, carruurta ayaa guul wayn ka gaara waxbarashada iyo nolosha.

DUGSIYADA AYAA DIYAAR U AH INAY IDIN CAAWIYAAN



Haddii aadan horay ula xariirin, la xariir dugsiya ilmaha aad awoowaha ama ayeeyada u tahay si aad u waydiiso su'aalahaaga. Dugsiyada ayaa kaa caawin kara taageerooyinka waxbarashada, dabeecada, caafimaadka dhimirka iyo jirka, iyo faya qabka guud ee qoyska.

Iskuday inaad la xariirto mid kamid ah xubnahaan shaqaalaha si aad u hesho xog dheeraad ah:

- macalinka
- la taliyaha dugsiya
- adeegaha bulshada ee dugsiya
- maamulaha
- kalkaalisada dugsiya

WAXAA JIRA KHAYRAAD KUU DIYAAR AH



Qaar badan oo kamid ah grandfamilies iyo qoysaska ehelka ah ayaa ka faa'iidaysta inay la xariiraan dadka kale iyo bulshada. Ku biirista kooxda dad kale oo leh nolol taada lamid ah ayaa ah fikir wanaagsan. Si aad u hesho koox ama taageerooyin kale oo caawinaaya qoyskaaga inta xaaladaan lagu jiro, iskuday khayraadkan Ohio. Guji mid kasta ama kameerada taleefankaaga saar QR code-ka si aad u hesho xog dheeraad ah.

OhioKAN



Kinship Caregivers Connect



Ohio Grandparent/ Kinship Coalition



go.osu.edu/grandresources

KALIGAA MA TIHID.

185,469

carruurta ku nool Ohio ee la nool awooweyaashood ama ayeeyooyinkood

